

Waa maxay Waxbarashada beeraleyda Magaalada?

SIDEE AYAA LOO MAALGALIYAA?

Daraasaadkaan ayaa si buuxda deeq uga hela Target. Taas oo qeyb ka ah daraasaadka, iskaashatada waxay horumarinayaan maalgalinta isdaba-jooga ah ee ikhtiyaarka beeraha waxbarashada. Marnaba ma, ahan daraasaadkaan ama beerta qudheeda in aysan saameyn ku yeelaneynin maalgalinta guud ee Dugsiyada dadweynaha Minneapolis MPS.

MAXAA U MALEYNAYSAA IN AY NOQON KARAAN WAXBARASHA BEERAHA DUGSIYADA DADWEYNAHA MINNEAPOLIS EE MAGAALADA KU YAALA ?

Ujeedada ka qeybgalka bulshada waa nidaam soconaysa (Hada –ilaa iyo bisha Maayo 2018) waana in ay ku lug leeyihiin, ardayda, urrurada bulshada, waalidiinta, shaqaalaha dugsiyada iyo maamulka, si ay uga qeyb qataan kana dhiibtaan aragtiyadooda ee ku saabsan sida ugu wanaagsan MPS. Wax walba oo ka sooxa natiijada, waxabarashadu waxay noqon doontaahadafka ugu muhiimsan.

WAA HALKEE GOOBAHA LAGU QABANAO?

Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan la shaqeyno quburada ku xeel dheer manhajka waxbarashada, naqshadeyna muuqaalka, Xirfadleyaasha dhalan rogida ciida, barayaasha dalaga beeraha, sahmiyeyaasha, qorsheeyeyaasha iyo quburada kale si ay u sameeyaan nidaamyo kale oo xulshada goobo kale oo ku saleysan natiijo u leh marxalada bilowga.

GOORMA AYAAN KA OGAANEYNAA IN BADAN?

Mashruucaan ka qeybgalka bulshada wuxuu soconayaa ilaa iyo bisha May, 2018, marka ay waaxda cunto karinta (Culinary) iyo adeega fayo-qabka ayaa marti galindoona dhacdooyinka xafladaha dabaaldaga mashruucaan. Bisha ogoosto iyo-September, 2018, kooxda la-talinta, waxay ku talinayaan in laga dhiso dugsiyada dhinaciisa meel qaab beereed ah. Waxaan rajeynaynaa in aan la wadaagno inta badan in uu geedi scoka sii socdo!

Barnaamijka Urban education “farms” waxay qaadan kartaa qaabab badan. Waxaana ka mid ah mowduucyada dhexe: oo ay isugu dhafan tahay barashada waayo aragnimada gudaha iyo dibada, abuurida isku xirka ilaha dalaga cuntada, barashada waxqabadka, iyo dhisida bulshada.

Waa kuwaan Tusaalooyin muhiim ah:

Mashruuca cunooyinka dugsiyada waxaa ka mid ah beerta California, jikada, iyo maqaayada King Dugsiyada dhexe, xaruntaan oo lagu tababaro laguna soo bandhigayo wixii loogu talo galay manhajka barista waxbarashada.

Barnaamijka EUSD waa sheybaarka beeraleyda Waa xarun waxbarasho oo dibadda ah loogu talo galay ardayda dhigata dugsiyada degmada ee Encinitas Union . Waxaana ka mid ah beeraha bushada, a play forest, a food meadow iyo kuwo kale oo badan.

Barnaamijka Great Kids Farm ku nool Magaalada Baltimore , waxay baraan ardayda ka shaqeynta beeraha dhammaan da’ kasta iyo dalaga cunada caafimaadka leh, beero waara iyo cilmiga sayniska dabiiciga ah.

